**Dugsiyada Dowlada ee Gahanna-Jefferson**
Garoonka iyo Safarada Kale ee Degmadu Maalgalinayso
2340
R.C. 3327.15

## FOOMKA OGOLAANSHAHA DAAWAYNTA SAFARKA HABEEN DHAXA

*CODSIGA IN SHAQAALAHA ISKUULKU MAAREEYO DAWOOYINKA DAKHTAR QORAY IY IYO KUWA AANU QORIN RUKHSAD LAGU HAYSANAYO OO LAGU ISTICMAALAYO DAAWADA NEEFTA EE AFKA LA ISKAGA BUUFIYO AMA CIRBAD GACMEEDKA LA ISKU DURO.*

**Magaca Ardayga:**__________________________________________ **Taariikhda Dhalashada:** _________________________

**Dugsiga:**__________________________________________________ **Fasalka**:______________________________________

**Safarka ay Degmadu Maalgalinayso:**________________________________ **Taariikhdaha safarka:** _____________________

**Tilmaamaha Qaybta**

**Qaybta 1aad - Codsiga Maaraynta Dawooyinka Dhakhtar Qoray iyo kuwa aan Dhakhtar Qorin**
Qaybtan waa inay kujiraan liiska dhamaan dawooyinka cungaaga laga doonayo inuu qaato inta lagu guda jiro safarka ay degmadu maaligalisay, iyada oo ay goob joog yihiin shaqaalaha iskuulka, loona qaadanayo sida uu u soo qorey xirfadle caafimaad oo shati u haysta daawo qorista (daawo qore). Marka qaybtan la biixnayo:

A.) Hadii aad "haa" ku calaamadayso dhamaan dawooyinka, uma baahnid inaad buuxiso foomam kale.

B.) Hadii aad "maya" calaamadiso mid kamid ah dawooyinka ilmahaaga, fadlan soo gudbi *Codsiga in Shaqaalaha Dugsigu Maareeyaan Dawooyinka Dhakhtar Qoray iyo kuwa Aan Dhakhtar Qorin*foomka (5330 F1)

Kaliya daawo ku jirta weelkii ay asal ahaan ku timid; oo ay ku qoran yihiin taariikhda; magaca ardayga; iyo cadadka inta laga isticmaalyo halkii mar ayaa la aqbali doonaa. Wixii ku saabsan hababka qaadista iyo keenista dawooyinka, fadlan raac tilmaamaha iskuduwaha safarka iyo kalkaalisada dugsida.

**Qaybta 2aad - Rukhsada in qofka asagu Dawada Qaato oo Maamusho**
Qaybtan waa inay ku jiraan liiska dhamaan dawooyinka neefta ee afka la iskaga buufiyo iyo cirbad gacmeedyada la isku duro ee ilmahaaga loo ogolyahay inuu qaato oo isticmaalo, sida uu xirfadlaha caafimaadku usoo qoray in loo qaato, xirfadlahaas oo ah mid ogolaansho u haysta inuu daawo qoro ("dawo qore"). Marka qaybtan la buuxinayo:

A.) Hadii aad "haa" ku calaamadayso dawada neefta ee afka lagu buufiyo/ ama qallinka cirbada la iskula duro, wax kale oo dheeraad ah looma baahna.

B.) Hadii aad "maya" ku calaamadayso, fadlan soo gudbi foomamka *U Oggolaanshaha Haysashada iyo Isticmaalka Dawada Neefta ee Afka la iskaga Buufiyo* (5330 F3) ama *Oggolaanshaha Haysashada iyo Isticmaalka Cirbada la isku Duro (qallinka cirbada la isku duro)* (5330 F4), sida loogu baahdo.

**Qaybta 3aad-Rukhsada Waalidka/Masuulka**
Qaybtan waa in waalidka/masuulka uu buuxiyo oo saxiixo.
*Daryeelka Sonkorowga, Ardaygu waa inuu haysto **Ogolaanshaha Waalidka & Ogolaanshaha Daryeel bixiyaha Caafimaadka kaas oo u ogolaanaya in Daryeelka Sonkorowga lagu Maaraynta dugsiga dhexdiisa (foomka 5330 F1dm) oo uu diiwaanka dugsia ugu jiraa,** Si waafaqsan Xeerka Gudiga 5336**.***

## I. **Codsiga Maaraynta dawooyinka dhakhtar qoray iyo kuwa aan dhakhtar qorin**

Fadlan qor dhamaan dawooyinka laga codsanayo in shaqaalaha dugsigu maareeyo (kuma jiraan dawada neefta ee afka la iskaga Buufiyo iyo Cirbadaha la isku Duro)

*Ardayga kor ku magacaaban waa inuu helaa daawada (dawooyinka) soo socda (dhakhtar qoray ama aanu qorin) inta lagu guda jiro safarka habeen dhaxa ee ay degmadu maalgalinayso, iyadoo ay siinayaan ama goob joog yihiin shaqaalaha dugsiga sida uu dhakhtarka dawada qorey farayo:*

| **MAGACA DAAWADA**<br>(dhakhtar qoray ama aanu qorin): | Foomka ***Codsiga in shaqaalaha dugsiu maareeyo daawooyinka dhakhtar qoray iyo kuwa aanu qorin ay maareeyaan*** **(5330 F1)** ayaa waxaa dhamasytiray dhakhtarka dawada soo qoray iyo waalidka/masuulka, waxaana sidoo kale soo buux buuxiyay rugta caafimaadka ee dugsiga: |
|---|---|
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |

* Hadii aad "maya" ku calaamadiso mid kamid ah dawooyinka ilmahaaga, fadlan soo gubi Codsiga in Shaqaalaha Dugsigu Maareeyo Dawooyinka Dhakhtar Qoray iyo kuwa aan dhakhtar Qorin foomka (5330 F1).

## II. U Oggolaanshaha Ardayga ee Haysashada oo Isticmaalka Dawada Neefta ee Afka lagu Buufiyo iyo/ama Cirbada la isku Duro

*Ardayga kor ku xusan waxaa* loo ogolaaday *rukhsad hore oo uu ku qaato kuna isticmaalo dawada deg dega ah sida uu farayo dhakhtarka dawada soo qoray:*

| MAGACA DAWADA UU QOFKU ISAGU QAADANAYO | Foomka ***U Oggolaanshaha Haysashada iyo Isticmaalka Dawada Neefta ee Afka lagu Buufiyo* (5330 F3)** ama ***Foomka Ogolaanshaha iyo Isticmaalka Cirbada la isku Duro (qallinka cirbada la isku duro)* (5330 F4)** ayaa waxaa soo dhamaystiray dhakhtarka dawada soo soqay iyo waalidka/masuulka, oo waxaa soo buux buxiyay rugta cafimaadka ee dugsiga ilmahaygu dhigto: |
|---|---|
| | • HAA<br>• MAYA |
| | • HAA<br>• MAYA |

*Hadii aad "maya" calaamadayso fadlan soo gudbi foomamka *Oggolaanshaha Haysashada iyo Isticmaalka Dawada Neefta ee afka lagu Buufiyo* (5330 F3) ama *Ogolaanshaha Haysashada iyo Isticmaalka Cirbada la isku Duro ama (qallinka cirbda la isku duro)* (5330 F4), sida loogu baahdo.

Keliya dawada ku jirta weelkii ay asal ahaan ku timid; oo ay ku qoranyihiin taariikhda, haddii dhakhtar soo qoray; magaca ardayga, iyo cadadka saxda ah ayaa la ogolaan doonaa in la qaato. Wixii ku saabsan hababka Qaadista iyo Keenista dawada, iyo qaadashada uu shakhsigu isagu qaadanayo dawada, fadlan raac tilmaamaha iskuduwada safarka iyo kalkaalisda dugisa.

---

## III. RUKHSADA WAALIDKA/MASUULKA

Waxaan halkan rukhsad usiinayaa cunugayga kor ku xusan in (calaamadee dhamaan waxa khuseeya):

- **La siiyo dawooyinka ku taxan qaybta 1aad, iyada oo ay u maareynayaan shaqaalaha dugsiga ee loogu talagaley si waafaqsan amarada sida gaarka ah uu u soo qoray xirfadlahayaga caafimaadka ee shatiga u haysta**
- **Iskii u qaadashada iyo isticmaalka dawada neefta afka laga qaato iyo ama qallinka cirbada la isku duro ee kor ku taxan, qaybta 2aad**
- **Inay maareeyaan daryeelkooga sonkorta si waafaqsan amarada sida gaarka ah uu usoo qoray xirfadlahayaga caafimaadka ee shatiga haysta**

Waxaan fahamsanahay inaan masuul ka ahay keenista dawadan si waafaqsan habka keenista dawada ee safarka, oo waxaan ogolahay in dawada aan la isticmaalin aan dugsiga ka qaato oo guriga u qaato marka safarku soo dhamaado. Waxaan ogolaadey inaan soo gudbiyo dhamaan foomamka la iskaga baahan yahay hadii aan "maya" ku calamaadeeyay dhamaan dawooyinka kor ku taxan.

Waxaan ogolaadey isgaarsiinta udhaxaysa dhakhtarka daawada qoray ama rugtooda caafimaadka, kalkaalisada dugsiga, isku duwaha safarka, iyo shaqaalaha loo igmadey maaraynta dawooyinka ilmahayga sida loogu baahdo.

Qor Magaca Waalidka/Masuulka:___________________________________________________________________________

Saxiixa Waalidka/Masuulka: _____________________________________________ Taariikhda:________________________